



Federal Republic of Somalia
Office of the President

SHARCI Lr. 28

30/11/2014

Oggolaanshaha Ansixinta Heshiis Dhax maray Dowladda Soomaaliya iyo
Dowladda Talyaaniga ee Dhinaca Iskaashiga Difaaca

MADAXWAYNHA J.F.S.

- Markuu Arkay :** Qodobka 90aad, Xarafaha 'F' iyo 'Q' ee Dastuurka Federaalka KMG
Markuu Arkay : Qodobka 99aad, Xarafaha 'F' ee Dastuurka Federaalka KMG
Markuu Arkay : Warqadda Guddoonka Barlamaanka Federaalka Lr.527/3/1/9/14
ee 04/11/2014
Markuu Arkat : Warqadda Xafiiska Wasiirka Koowaad Lr. XR/GB/00580/10/13 ee 17/10/2013
Markuu Arkay : Warqadda Guddiga Difaaca ee Golaha Shacabka Lr.GD/G/0038/10/14 ee 22/10/2014
Markuu Arkay : Heshiiska Dhexmaray Dowladda Soomaaliya iyo Dowladda Talyaaniga
ee Dhinaca Iskaashiga Difaaca

Waxuu Madaxwaynaha soo saaray Sharcigaan

Qodobka 1aad

Laga bilaabo maalinlanta uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo Sharcigaan la oggolaaday Hashiiska Dhexmaray
Dowladda Soomaaliya iyo Dowladda Talyaaniga kunaa saabsan dhinaca Difaaca.

Qodobka 2aad

Waxaa Shaarcigaan ku lifaaqan Heshiiska dhexmata labada Dal ee Soomaaliya iyo Talyaaniga

Qodobka 4aad

Waxuu Sharcigaan dhaqangelayaa maalinlanta uu saxiixo Madaxwaynaha waxaana lagu soo daabicci doonaa
Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

MUQDISHO 30/11/2014

XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD	
WAA LA DIWAAN GELIYEEY	
DIWAAN NO.	11/11/060/2014
TAARIKH	13/12/2014
SAXIIXA NO.	



Madaxwaynaha J. F. S.
Mugane Kasan Sheekh Maxamuud



Federal Republic of Somalia
House of the People
Office of the Speaker

Ref: 27/3/1/9/14: الرقم

Mogadishu, 4th November, 2014 التاريخ

Ku: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Ku: R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Ku: Garyaqaanka Guud ee Dawladda
Muqdisho.

Og: Guddiga Difaaca
L/H. Golaha Shacabka

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka
L/H. Golaha Shacabka

Og: Agaasimaha Waaxda Shuruucda
L/H. Golaha Shacabka

Ujeedo: Soo Gudbin Ansixinta Heshiis Dhex Maray Dowladda Soomaaliya iyo Dowladda
Talyaaniga ee Dhinaca Iskaashiga Difaaca.

M.ne Madaxweyne,

Waxaan kuugu wargelinayaa inuu Golaha Shacabka Federaalka ee Jamhuuriyadda Soomaaliya go'aan ka gaaray Ansixinta Heshiis Dhex maray Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Talyaaniga ee Dhinaca Iskaashiga Difaaca oo halkan ku lifaaqan, wuxuu Golaha Shacabka fadhigiisa 7aad ee Kalfadhiga 5aad ee 3da Nofeembar, 2014 oo ka dhacay xaruntiisa Caasimadda Jamhuuriyadda Muqdisho ku ansixiyey cod furan oo dhacay sidan hoos ku xusan:

- Xildhibaan Ogolaadeen: 134 (Boqol Sodon iyo Affar)
- Xildhibaan Diidey: 3 (Seddex)
- Xildhibaan ka aamusay: 5 (Shan)

Fiiro Gaar ah: M.ne Madaxweyne, waxaan kula socodsiineynaa inay Guddiga Difaaca ee Golaha Shacabku sixid ku sameeyay nuqulka Af-Soomaaliga ah, Qodobka V oo laba jeer soo noqday tiro ahaan kana dhigay VI, sidoo kale Qodobka 1aad faqradda (D) wuxuu ku kordhiyey

Tell: +252 612224441/ +252 616312787


E-mail: speaker@parliament.gov.so

Website: www.parliament.gov.so

"haddii heshiiskan wax lagu daro ama laga dhimo waa in hay'adda Sharci dejinta ogolaasho looga helaa" iyo "haddii wax ka beddel ah lagu sameeyo iyadoo loo marayo dhabaha Diblomaasiyadeed waa in ogolaanshiyo looga helaa Hay'adda Sharci dejinta".

Habbada, M.ne Madaxweyne, waxaan si waafaqsan Qodobka 90aad xarafka (q) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka kaaga codsanaynaa in aad go'aanka Golaha ku oggolaato Xeer-Madaxweyne, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ee Dawladda si waafaqsan Qodobada 84aad iyo 85aad ee Dastuurka.

Anigoo huba in waajibkaaga Datuuriga ah aad ka gudan doonto, waxaad magaca Golaha Shacabka nooga guddoontaa salaan diiran iyo qaddarin gaar ah.


M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawab" 
Guddoomiyaha Golaha Shacabka.

ANSIXINTA HESHIISKA DHEX MARAY DOWLADDA
SOOMAALIYA IYO DOWLADDA TALYAANIGA EE
DHINACA ISKHAASHIGA DIFAACA

Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS

Tirada Xubnaha Codeysay 142: Oggol (134)- Diidmo (3)- ka aamustay (5)

Saxiix: M. ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"

Taariikh: 4th November, 2014

Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Baarlamaanka JFS

Saxiix: M. ne Jeylaani Nuur Iikar

Taariikh: 4th November, 2014

Guddoomiye ku-xigeenka 2aad- Baarlamaanka JFS

Saxiix: M. ne Mahad Cabdalla Cawad

Taariikh: 4th November, 2014





Ref: GD/G/0038/10/14

Taariikh: 22/10/2014

Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka J.F Soomaaliya

= Muqdisho=

Ujeedo: Soo Gudbin Heshiis


Mudane Guddoomiye,

DHICIS
ASendaha: Soo
GAU
25/10/14 *[Signature]*




Annagoo ah, Guddiga Difaaca Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya markeeynu aragnay cutubka 7 aad qodobkiisa 46 aad ee xeerhosaadka Waxaanu halkan idiinku soo gudbinaynaa Heshiiska iskaashi ee dhexmaray Dawlada Federaalka Soomaaliya iyo Dawlada Talyaaniga oo Golaha Sgo gaaray Taariikhdu markay ahayd 17/10/2013 Sumadeeduna ay ahayd Ref: XRW/GB/00580/10/13 waxanu Akhrin qodob qodob ah oo labadda nuqulba ah ku sameynay heshiiskan.

1. Guddigu wuxuu sixid ku sameeyay nuqulka Af-Soomaaliga ah, qodobka V oo laba jeer soo noqday tiro ahaan kana dhigay VI
2. Sidoo kale Guddigu waxa uu qodobka 1-aad farqada (D) ku siyaadiyay sidan "haddii heshiiskan wax lagu daro amma laga dhimo Waa in Hay'adda sharici dajinta ogolaasho looga helaa"
3. guddiga waxuu ku kordihyay hishiiskan haddii wax isbedel ah lagu sameeyo iyadoo loo marayo dhabaha dublamaasiyadeed waa in ogolaanshiyo looga helaa hay'adda sharci dejinta

Haddaba Guddigu waxa uu codsanayaa in la ansixiyo, lana meel mariyo Heshiiskan.



Liiska xubnaha Guddiga Difaaca

o.	Magaca	Saxiixa
	Xil. Xuseen Carab Ciise	
	Xil. Max,med Ibraahim Max,med (Xaabsade)	
	Xil. Max,ed Xuseen Nuur (Xagaafe)	
	Xil. Max,ed Xuseen (Afraale)	
	Xil. Axmed Mayow Cabdulle (Ruush)	
	Xil. Botaan Ciise Caalin	
	Xil. Saciid Xassan Geedi	
	Xil. Max,ud Cali Dhuux	
10	Xil. Cabdalle Boos Axmed	
	Xil.Axmed koosaar Celmi	
12	Xil.Axmed Jimcaale Geedi	

Jamhuuriyadda Soomaaliya
Xukuumadda Federaaliga ee Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha



جمهورية الصومال
الحكومة الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Government of the Somali Republic
Office of the Prime Minister

Ref: XRW/GB/00580/10/13

Taariikh: 17/10/2013

Ku: Guddoonka Baarlamaanka J. Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

Ujeeddo:- Soo Gudbin Heshiis

Mudane Guddoomiye;

Waxaan si xushmad iyo qaddarin leh idinkugu soo gudbinaynaa heshiis dhexmaray Dowladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Dowladda Jamhuuriyadda Talyaaniga, kuna saabsan dhinaca iskaashiga Difaaca oo Soomaaliya lagu kaalmaynayo.

Heshiiskani waa mid cad oo is-fasiraya, waafaqsanna Dastuurka, waxaana idinku codsanaynaa in aad fududaysaan meel marintiisa.

Mahadsanidiin



Mudane Cabdi Faarax Shirdoon (Saacid)
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda F. Soomaaliya

Jamhuuriyadda Federaalka
Soomaaliya
Wasaaradda Gaashaandhigga
Xafiiska Wasiirka



جمهورية الفيدرالية
الصومال
وزارة الدفاع
مكتب الوزير

Federal Republic of the Somali
Ministry of Defense
Office of the Minister

Ref: WG/00632/13

Date: 16/10/13

Ku: Ra'iisul-wasaaraha Xuk. Federaalka Soomaaliya

=Muqdisho=

Ujeeddo: **Soo Gudbin Heshiis**

Mudane Ra'iisul-wasaare,

Adigoo wixii faahfaahin ah ka aqrisan doona document-ga halkan ku lifaaqan oo ah Heshiis dhex maray **Dowladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** iyo **Dowladda Jamhuuriyadda Talyaaniga**, kuna saabsan dhinaca iskaashiga Difaaca ee labada waddan.

Heshiiskaasi waa heshiis waafaqsan Dastuurka Dalka iyo Axdiga Qaramada midoobay (**UN Charter**), ayaan waxaan si xushmad leh kaaga codsanayaa in heshiiskaas ay ansixiyaan Golaha Wasiirada si loogu gudbiyo Baarlamaanka .

Mahadsanid:



Amrullah
C/xakiim Maxamuud Xaaji Faqi
Wasiirka Gaashaandhigga

Office of the Ministry, Landline: +252-1-941140+252-1-941142/ Mobil:

E-mail: defencesom60@yahoo.com/ amhajiyaqi@gmail.com Mogadishu, Somalia.



HESHIIS

U DHEXEEYA

**DAWLADDA JAMHUURIYADDA
FEDERAALKA SOMAALIYA**

IYO

**DAWLADDA
JAMHUURIYADDA TALYAANIGA**

**DHINACA ISKAASHIGA
DIFAACA**

**HESHIIS U DHEXEYYA DAWLADDA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA
SOMAALIYA IYO DAWLADDA JAMHUURIYADDA TALYAANIGA DHINACA
ISKAASHIGA DIFAACA**

HORDHAC

Dawladda Jamhuuriyadda Federaalka Somaaliya iyo Dawladda Jamhuuriyadda Talyaaniga (oo heshiisnaan lagu tilmaami doono "Dhinacyada"):

Ayaga oo u hoggaansan Axdiga Jamciyadda Qarumaha Midoobay;

Ayaga oo raba in ay horay u mariyaan iskaashiga labadooda dal;

Ayaga oo wadaaga aragtida ah in iskaashi ay ka wadagaan dhanka difaaca uu sii xoojin doono cilaqaadka labada Dhinac;

Maanka ku haya Qaraarka Lambar 2093 (2013) ee Golaha Ammanka ee Jamiciyadda Qarumaha Midoobay, ee soo baxay 6dii bishii Maarso 2013,

Waxay isla oggolaadeen qodobada soo socda:

I. MABADI'DA IYO UJEEBADA HESHIISKA

Iskaashiga ka dhexeeya labada Dhinac, waxaa xakameeynaya mabadii'da sinaanta, is-xurmeeynta iyo danaha ay labada Dhinac wadagaan, waxaana Heshiiskan lagu meel marin donaa si waafaqsan shuruuca gudaha ee waddan walba u degsan iyo shuruuca caalamiga ah iyo sidoo kale shuruuca iyo nidaamyada Yurub, si loo dhiiri geliyo, loo fududeeyo oo hore loogu mariyo iskaashiga dhinaca Difaaca ee labada Dhinac.

II. ISKAASHIGA GUUD

1. Hirgelinta Heshiisnaan

- a. Iyada oo laga ambaqaadayo Heshiisnaan, labada Dhinac waxay isla meel dhigi karaan qorshe ku wajahan wakhtiga fog iyo mid sannadle ah oo ku saabsan iskaashiga dhinaca Militariga. Qorshahaas wuxuu qeexi donaa qaababka iskaashiga wuxuuna si cad u cayimi donaa nooca iskaashiga iyo waqtiga la fulinayo ama la hirgalinayo, shirarka dhici doona iyo tirada xubnaha ka qayb gali doonta, meelaha ay shirarkaasi ka dhici doonaan iyo qaababka loo hirgalin doono hawlahaas.
- b. Qorshaha sannad laha ah ee iskaashiga labada Dhinac waxaa isla saxiixi doona wakiilada loo igmaday ee labada Dhinac ka tirsan marka la isla cayimo xubnahaas oo lagu heshiiyo.
- c. Abaabulidda iyo hirgelinta hawlaha Iskaashiga Difaaca ee labada Dhinac waxaa mas'uul ka noqon doona Wasaaradda Gashaandhigga Jamhuuriyadda Soomaaliya iyo Wasaaradda Gashaandhigga Jamhuuriyadda Talyaaniga.
- d. Wada-tashiyada dhex mari kara wakiilada labada Dhinac waxaa si is-dhaaf ah

loogu kala qaban donaa magalooyinka Muqdisho iyo Roma si la isula meel dhigo, haddii ay suurta gal tahay oo isla markaa la isla oggolaado in qodobo kale oo khaas ah lagu kordhiyo heshiiskaan ama la isla meel dhigo mashaaric cusub oo ay xiriir ka yeeshaan Ciidamada Ammaanka Somaaliyeed iyo Ciidanka Qalabka Sida ee Talyaaniga.

2. Noocyada Iskaashiga

Iskaashiga labada Dhinac wuxuu ka koobnaan kara qaybaha soo socda iyada oo la kordhin karo oo aysan intaas keliya ku kobnayn:

- a. Jangooyada siyaasadda Nabadgalyada iyo Difaaca;
- b. Cilmi baarista iyo horumarinta, taakulaynta dhinaca Logistikada iyo soo iibsashada qalabka Difaaca iyo hawlaha kale ee la xariira;
- c. Hawlgallada Nabad Ilaalinta (Peace Support Operations-PSO) iyo hawlgallada bani aadanimo;
- d. La dagaalanka burcad badeeda iyo hawlaha kale ee la xariira nabadgalyada badaha;
- e. Abaabulka iyo dhismaha Ciidanka militeriga, qalabaynta cutubyada iyo maamulka shaqaalaha;
- f. Abaabulka iyo maamulidda ciidammada Militeriga;
- g. Ilaalinta beyadda iyo wasakhaynta hawada oo ay dhalin karaan hawlgallada ciidammada;
- h. Waxbaridda iyo tababaridda shaqaalaha Ciidanka Qalabka Sida Somaaliyeed dhinaca culuunta militeriga;
- i. Hawlaha Caafimaad ee militariga;
- j. Taariikhda Ciidammada;
- k. Isboortiga militeriga;
- l. Iyo qaybahii kale oo ay labada Dhinac dantu ugu wada jirto;

3. Qaababka loo Hirgalinayo Iskaashigaan

Iskaashiga labada Dhinac ee ku saabsan amuuraha Difaaca waxaa lagu hirgelin karaa qaababka soo socda:

- a. Is dhaafsi booqashooyin lagu tago hay'ado military amase kuwa rayid ah;
- b. Is-dhaafsigu waayo aragnimada qubarada labada Dhinac;
- c. kulamo ay yeeshaan wakiilada hay'adaha nabadgalyada labada Dhinac;
- d. Tababarro iyo kobcinta aqoonta shaqaalaha labada Dhinac;
- e. Ka qayb galka hawladeenada labada Dhinac ee tababarrada teoriga ah iyo kuwa braktikada ah ee ka koban kuwo muddo gaaban oo noqon kara korsooyin, seminaaro, shirar, aqoon is weydaarsi, miis wareegsan iyo wixii la mid ah oo lagu qabanayo xarumaha rayidka ah amase kuwa ciidammada ee labada Dhinac;
- f. ka qayb galka dabridyada militariga;

- g. ka qayb galka hawlgallada nabad ilaalinta iyo kuwa bani aadanimada;
- h. booqashooyinka maraakiibta iyo dayuuradaha ciidammada;
- i. is-dhaafsiga booqashooyinka horumarinta dhaqanka iyo isboortiga;
- j. dhirigelinta hawlaha la xariira ganacsiga, kala iibsashada qalabka iyo hawlaha la xariira Difaaca;
- k. qayb kasta oo kale oo ciidammada la xiriirta oo ay labada Dhinac u arkaan in ay dan u wada tahay.

III. ISKAASHIGA DHINACA QALABKA CIIDAMMADA

1. Tageeridda Talabooyinka Ganacsi

Dhinacyada, ayadoo ujeedadu tahay in la qafiifiyo xakameeynta ku saabsan qalabka ciidammada iyo hawlaha la xiriira, waxay ku heshiyeen in ay tageraan hawlaha ganacsi iyo arrimaha la xiriira oo khuseeya dhinacyada ay ku jirto danta labada Dhinac.

2. Hababka

Dhaq-dhaqaaqa iibsashada qalabka la xiriira dhanka difaaca, cilmi barista iyo sidoo kale qalabka Militeriga waxaa lagu fulin karaa hababka soo socda:

- a. cilmi baaris, tijaabo iyo hindisid;
- b. is weydaarsi waaya aragnimada dhanka farsamada;
- c. soo saaridda, casriyeen iyo hawlo farsamo qaybaha ay labada Dhinac isla go'aansadaan;
- d. soo iibinta qalabka Militeri ee ku saabsan barnaamijyada labada Dhinac wadagaan iyo soo saaridda qalabka uu labada Dhinac midkood dalbado, ayadoo la tixgalinayo shuruuca daakhiliga ah ee waddamada oo la xiriira soo dhoofsashada iyo dhoofinta qalabka Militeri;
- e. in la tageero warshadaha soo saara qalabka difaaca iyo hay'adaha Dawliga ah si loo abuuro iskaashi dhinaca soo saaridda qalabka Militeriga;

3. Ballanqaadyo

Dhinacyadu waxay si wada jir ah isaga kaashan doonaan kana wada shaqayn doonaan sidii loo abuuri lahaa jawi ay warshadaha amase urururada labada Dhinac ay ku fulin karaan qodobbada ku xusan Heshiiskan.

IV. LAHAANSHAHA HANTIDA HAL-ABUURKA (INTELLECTUAL PROPERTY)

Dhinacyada waxay ballan qaadayaan ineey hirgaliyaan hababkii lagu xafidi lahaa oo loo dhawri lahaa hantida lahaanshaha hal-abuurka (Intellectual Property) oo ay ka mid yihiin shatiyada si waafaqsan qodobbada heshiiskan ay wada saxixdeen dhinacyadu.

V. XAALADDA SHAQAALAHA

1. Xubnaha uu ka kooban yahay shaqaalaha Talyaaniga ah waxaa laga cafinayaa dhamaan wixii ah canshuuraha dakhliga iyo nooc kasta oo ah canshuurta tooska ah. Waxaan laga dhaafi doonin wixii ay ka isticmalaan hawlaha adeegga bulshada iyo kharajka kale ee ku baxa hawlo loo fuliyay.
2. Lama saari karo wax xanibaad ah xorriyadda dhaq-dhaqaaqa ee soo gelidda iyo ka bixitaanka gudaha Somaaliya shaqaalaha ka tirsan Dawladda Talyaaniga iyo qoysaskooda markii ay muujiyaan basaboar sharci ah, ayagoo iska bixinaya wixii kharaj ah ee ku waajib ah oo la xiriira gelitaanka iyo ka bixidda Somaaliya, sida waafaqsan shuruudka u degsan Somaaliya dhanka Socdaalka
3. Shaqaalaha Talyaaniga ah waxay ka wantobayaan iney qadaan talaabo amase hawlo aan waafaqsanayn dhex-dhexaadnimada iyo caalamnimada waajibadkooda amase aan waafaqsanayn qiirada qodobada Heshiiskan, waxaana waajib ku ah iney dhawraan dhammaan shuruudka iyo nidaamyada u degsan waddanka Somaaliya.
4. Dawladda Federaalka Somaaliya, haddii ay la noqoto, waxay siin kartaa waraaqaha aqoonsiga xubnaha ka tirsan shaqaalaha Talyaaniga ah.
5. Shaqaalaha Talyaaniga ah inta ay socdaan hawlhooda amase wixii la xiriira fulinta waajibadkooda meel marinta Heshiiskan waxay hoos tagayaan nidaamka shuruudka iyo awooda dishiblilineed ee waddankooda.

V. XALINTA KHILAFADKA

Khilaaf kasta oo ka dhasha tarjumidda amase meel marinta Heshiiskan sida keliya ee lagu xalin karaa waa wada-tashi iyo wada xajood ka dhexeeya labada Dhinac ayadoo loo marayo dhabaha diblomasiyadeed.

VII. DHAQAN GELIDDA

Heshiiskan wuxuu dhaqan galayaa tariikhda markii la isu soo gudbiyo wargelinta 2aad ee labada ogeysiis ee qoraalka ah oo ay tahay labada Dhinac iney isku wargelinayaan ee ku saabsan in Dhinac waliba fuliyay waajibadkii ka sarnaa dhanka waddankooda gudahiisa dhaqan gelinta heshiiskan ayadoo loo marayo dhabaha diplomaasiyadeed.

VIII. BROKOKOOLU DHEERI AH, ISBEDELLO, DIB UGU NOQOSHO IYO BARNAMIJO

1. Haddii labada Dhinac isla oggoladaan, brokokooolu dheeri ka ah qodobbada Heshiiskan ayaa waxaa lagu heshiin karaa in lagu kordhiyo arrimo quseeya qaybo gaar ah ee iskaashiga oo sameeya dhinaca wax ka wada qabsiga arrimaha difaaca oo ku xiriira hay'ado military ah amase rayid ah ayadoo la waafajinayo qodobbada Heshiiskan.

S

2. Brotokoolada dheeriga ah waxaa ka wada xajoon doona labada Dhinac si waafaqsan shuruucda Qarankooda, waana in ay ku kobnadaan oo keliya ujeedada Heshiiska, ayadoo aan la jabin shuruucda gudaha ee Dhinacyada.
3. Hirgalinta barnaamijyada ka dhasha Heshiiskan amase brotokoolada lagu daro, waxaa ka wada xajoonaya, ka wada hadlaya, hindisaya isla markaana hirgelinaya shaqaale ay igmadeen Wasaaradda gashaandhigga ee Jamhuuriyadda Somaaliya iyo Wasaaradda Gashaandhigga Jamhuuriyadda Talyaaniga, markii la tixgaliyo danaha la wadaago, ayadoo isla markaa lala kaashanayo Wasaaradaha Arrimaha Dibedda ee labada Dhinac markii ay arrintu khuseeyso.
4. Heshiiska waxaa lagu samayn karaa beddelo amase waxaa lagu samayn karaa dib u eegid markii labada dhinac isku af-gartaan ayagoo is weydaarsanaya qoraalo loo adeegsanayo dhabaha diblomaasiga ah.
5. Brotokoolada dheeriga ah, wax ka beddelidda iyo qodobada dib loo saxo ee Heshiiskan waxay u dhaqan gelayaan sida ku cayiman unugga VII (DHAQAN GELIDDA) ee Heshiiskan.

IX. MUDDADA UU SOCONAYO IYO BURINTA HESHIISKAN

1. Heshiiskan wuxuu dhaqan gal ahaan donaa inta labada Dhinac midkood uu go'aansado inuu ka baxo wakhti kasta.
2. Haddi labada Dhinac midkood ka baxo Heshiiskan, Dhinaca kale waxaa lagu wargelinayaa qoraal la marsiinayo dhabaha diblomaasiyadeed, wuxuuna ka bixidda Heshiisku dhaqan galeysaa sagaashan (90) malmood markii qoraalka ogeysiinta ah soo gaaro Dhinaca kale.
3. Ka bixidda Heshiiskan oo ka yimaada labada Dhinac midkood, sameeyn kuma yeelan doono barnaamijyada iyo hawlaha markaa socda, haddii aysan go'aan kale ka wada gaarin labada Dhinac.

AYADOO MARKHAATI LEH, saxiixayaashan, ayagoo si sharci ay u wakisheen Dawladahoodu waxay saxixeen Heshiiskan.

Lagu sameeyay magaalada Rooma, tariikh 17kii Sebteember 2013 laba nuqul oo rasmi ah, oo labaduba ku qoran luqada Ingiriiska, ayadoo qoraalka labada nuqul ay yihiin isku mid ah.

WAKIILKA JAMHUURIYADDA
FEDERAALKA EE SOMAALIYA

WAKIILKA DAWLADDA
JAMHUURIYADDA TALYAANIGA

6



AGREEMENT

BETWEEN

THE FEDERAL GOVERNMENT
OF THE SOMALI REPUBLIC

AND

THE GOVERNMENT OF THE
ITALIAN REPUBLIC

ON DEFENCE COOPERATION

*Beux.
Haloo Zayiro
diidhiiranaada
uba nuzulki ay
cadsadeen into
adu la codeyn-
5/7/14*

BARLAMAANKA FEDERAALKA SOMALIYA
XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GELID / RECEIVED
TAR: 5/7/2014
TIX: 265
SIXIIX: 13/maare

programmes between the Somali National Security Forces and the Italian Armed Forces.

2. Fields

The cooperation between the Parties may include, but is not limited to the following areas:

- a. security and defence policy;
- b. research and development, logistic support and acquisition of Defence products and services;
- c. Peace Support Operations (PSO) and humanitarian operations;
- d. counter piracy and other maritime security activities;
- e. Military Forces organization, structure and equipment of military units, personnel management;
- f. organization and management of the Military Forces;
- g. environmental issues and pollution caused by military activities;
- h. education and training in military field of the Somali National Security Forces personnel;
- i. military medical service;
- j. military history;
- k. military sport;
- l. other military fields that may be of mutual interest to the Parties.

3. Modalities

The cooperation between the Parties, on Defence matters, may take the following modalities:

- a. mutual visits by delegations to civil and military entities;
- b. exchange of experiences between the experts;
- c. meetings between Defence Institutions representatives;
- d. education and training of the Parties' personnel;
- e. participation of the Parties' personnel in theoretical and practical training courses, orientation periods, seminars, conferences, round table discussions and symposiums, offered in military and civil entities of Defence establishments;
- f. participation in military exercises;
- g. participation in peacekeeping and humanitarian operations;
- h. visits of military ships and aircrafts;
- i. exchange of cultural and sporting activities;
- j. support of commercial initiatives related to defence products and services linked to Defence matters;
- k. any other military fields that may be of mutual interest to the Parties.

III. COOPERATION IN THE FIELD OF MILITARY PRODUCTS

1. Support to Commercial Initiatives

The Parties, with the aim of streamlining the control concerning to military products and procedures of activities related to that, agree to support other commercial initiatives correlated to the mentioned sphere and to the areas of mutual interest.

2. Modalities

The activities in the field of Defence procurement and research, as well as the military equipment may take the following modalities:

- a. scientific research, test and design;
- b. exchange of experience in the technical sector;
- c. production, modernization and technical services in sectors decided by Parties;
- d. procurement of military equipment within the frame of common programs and production ordered by one of the Parties, according to their Countries' domestic laws concerning import and export of military products;
- e. support to the Defence industries and governmental bodies in order to create co-operation in the field of military material production.

3. Commitments

The Parties will offer mutual assistance and collaboration to foster the fulfilment by industries and/or organizations concerning this Agreement and contracts signed under its provisions.

IV. INTELLECTUAL PROPERTY

The Parties commit themselves to put into effect the procedures required to ensure the safeguarding of all the intellectual property including patents stemming from the activities carried out in compliance with this Agreement, according to their laws and to International Agreements in this area signed by the Parties.

V. STATUS OF PERSONNEL

1. Members of the Italian personnel shall be exempt from income tax and any other form of direct taxation. They shall not be exempt from user charges for public utilities or from charges for other services rendered.
2. No restriction shall be placed on the freedom of entry into and exit from Somalia of individual members of the Italian personnel, and their dependants on production of a valid passport and subject to payment of any port of entry or exit fees, in accordance of the Somali Immigration rules.
3. The Italian personnel shall refrain from any action or activity incompatible with the impartial and international nature of their duties or inconsistent with the spirit of the present agreement, and shall respect all local laws and regulations.
4. The Federal Government of Somalia may issue identity documents as they deem necessary for the Members of the Italian personnel working in Somalia.

5. The Italian personnel during or in connection with their mission/exercise under this Agreement will be subject to their own jurisdiction and disciplinary powers.

VI. SETTLEMENT OF DISPUTES

Any dispute regarding the interpretation or application of this Agreement shall be resolved exclusively through consultations and negotiations between the Parties through diplomatic channels.

VII. ENTRY INTO FORCE

This Agreement shall enter into force on the date of receiving the second of the two written notifications by which the Parties shall inform each other, through diplomatic channels, of the fulfilment of their respective domestic requirements for the entry into force of this Agreement.

VIII. SUPPLEMENTARY PROTOCOLS, AMENDMENT, REVISION AND PROGRAMS

1. With the consent of the Parties, supplementary Protocols may be agreed on specific areas of co-operation on Defence matters involving military and civilian entities, under the terms of this Agreement.
2. Supplementary Protocols which will be negotiated between the Parties shall be elaborated according to national procedures and shall be restricted to the purposes of this Agreement without contradicting the respective national legislations.
3. Implementation programs that will give effect to this Agreement or its Supplementary Protocols shall be elaborated, developed and implemented by the personnel authorized by the Ministry of Defence of the Somali Republic and the Ministry of Defence of the Italian Republic, according to mutual interest, in close coordination with the Ministries of Foreign Affairs of the Parties, where applicable.
4. This Agreement may be amended or revised by mutual consent through an Exchange of Notes between the Parties, through diplomatic channels.
5. Supplementary Protocols, amendments and revisions shall enter into force as specified in Section VII (ENTRY INTO FORCE) of this Agreement.

IX. DURATION AND TERMINATION

1. This Agreement will remain in force until one of the Parties decides, at any time, to terminate it.
2. The termination by one Party shall be notified to the other Party in writing and through diplomatic channels, being effective ninety (90) days after the receipt of the notification by the other Party.

3. The termination of this Agreement shall not affect any on-going programs and activities under this Agreement, unless otherwise decided by the Parties.

IN WITNESS WHEREOF, the undersigned, being duly authorized thereto by their respective Governments, have signed this Agreement.

Done at Rome on 17/09/2013 in two originals, both in English language, all texts being equally authentic.

FOR THE FEDERAL GOVERNMENT
OF THE
SOMALI REPUBLIC
Abdihakim Mohamed Haji FIQI



FOR THE GOVERNMENT
OF THE
ITALIAN REPUBLIC
Mario MAURO

